

OFFICIAL

Dadka degan
200 Dorcas Street
SOUTH MELBOURNE

Mudanaha/Marwada guriga degan

Waxaan qoraalkan kuugu soo dirayaa inaan kula socodsiiyo halka ay marayaan howlihii dhismeyaalka iyo barnaamijkii dib loogu dhisayay saraha dhaadheer ee ay Homes Victoria wadeen.

Marxaladdii xigtay ee barnaamijka ayaa hadda ka socota 7 goobood oo cusub. Taasi micnaheedu waxay tahay inay hada meel fiican noo marayaan dhisida aan 9 xaafadood uga dhiseyno guryo loogu talagalay dadka meesha degan hada iyo kuwa mustaqbalka soo degi doonaba guryahaas oo noqon doona kuwo ka fiican, ka amni wanaagsan iyo kana raaxo badan guryihii hore. **Warka maanta la shaaciyay ma saameyn doono dhismaha aad degan tahay ama gurigaaga.**

Waxyaabaha maanta lagu dhawaaqay?

Maanta, waxaan dadka guryaha degan kala hadalnay dib u dhiska lagu sameynayo dhismayaashan:

- 25 iyo 27 King Street, Prahran
- 150 Inkerman Street, St Kilda
- 150 Victoria Avenue, Albert Park
- 159 Melrose Street, Waqooyiga Melbourne
- 29 Crown Street, Flemington
- 94 Ormond Street, Kensington

Laga bilaabo bisha Luulyo 2026 ilaa bisha Febraayo 2028, waxaan bilaabi doonaa inaan si dhow ula shaqeyno dadka ku nool guryahan si aan uga caawino inay u guuraan guri ku haboon inta aan ka diyaarineyno guryo ka tiro badan kana tayo wanaagsan kuwii hore.

Waxaan guryo cusub ka dhiseynaa meel goobta ka ag dhow

Guryo cusub ayay hadadanba dhismahoodu ka socdaan meel goobta ka ag dhow si ay dadka meesha deggan uga caawiyaan fursadaha dib u dejinta. Waxaa la filayaa in la dhammaystiro sanadkan waxaana ka mid ah:

- Essex Street, Prahran
- Simmons Street, South Yarra
- Barak Beacon, Port Melbourne
- Holland Court, Flemington

Guryahan waxay noqon doonaan kuwo si sahlan loo kululeyn karo loona qaboojin karo, raaxana ay ku dareemayaan dadka baahiyaha dhaqdhaqaaqa leh iyagoona ay ka ag dhow yihiin meel gadiidka dadweynaha laga raaci karo. Waxay sidoo kale lahaan doonaan amni, iftiin iyo hawo wanaagsan waxaana intaas usii dheer inay lahaan doonaan balakoono iyo qolal kuu gooni ah oo dharka lagu dhaqdo.

Xaafadaada dhexdeeda

Dhismaha aad degan tahay qeyb kama aha marxaladda xigta ee howlaha dib-u-dhiska. Wax dambe oo dib-u-dejin ah oo dhici doona inta aan la gaarin bisha Janaayo 2028 ma jiri doonaan, waana kula soo xiriiri doonaa marka la gaaro waqtigaas.

Dhanka kale xaafadaada, Dawlada Dhexe iyo Dawlada Victoria waxay si wada jir ah uga wada shaqaynayaan iyada oo loo marayo Dhisidda Guryeynta Weyn iyo Sanduuqa Mustaqbalka ee Guryeynta Australia in la bixiyo 131 guri oo guryo cusub oo bulsho/dowlad ah. Tani waa tillaabadii ugu horeysay ee dib loogu dayactiri lahaa degmada South Melbourne iyadoo aragtida fogna ay tahay in la bixiyo guryo tayadoodu sarreyso oo ku yaal xaafad amnigeedu wanaagsan yahay, si wanaagsan loo qaabeeyey isla markaasna leh xaafado si fiican isugu xiran.

Maxaa ka socda goobaha kale?

Elgin iyo Nicholson Streets ee Carlton, qorshayaasha guryaha cusub waxaa hagayay talooyinka ay nala wadaageen dadka meesha deggan. Duminta ayaa hadda socota si loo bixiyo 248 guri oo ah guryo cusub sanadka 2028.

Howlaha dib-u-dejinta ayaa gebogebo u maraya **Flemington iyo North Melbourne**. Waxaan isku diyaarineynaa inaan bilowno duminta iyadoona marxaladda xigta lagu martiqaadi doono dadka guryaha degan si loo ururiyo fikradahooda ku aadan sida loo nashqadeynayo guryaha cusub iyo goobaha bulshada.

Qoysas badan oo guuraya oo ku nool **South Yarra iyo Richmond** ayaa u guuray guryo cusub oo goobta ka ag dhow. In ka badan 85% qoysaska ayaa mar hore guuray, ama hada ayay qorsheynayaan inay guuraan, dhammaantoodna waxaa meel fiican u maraya howlaha guuritaanka si ay usoo gebagebeeyaan bisha Febraayo 2026.

La soco wixii soo kordha oo nagu xirnoow

Waxa aad booqan kartaa homes.vic.gov.au si aad u hesho macluumaadka ku saabsan howlaha dib-u-dhiska, macluumaadkaas oo ay kujiraan mid ku qoran luqadaada. Waad nagu xirnaan kartaa haddii aad is diiwaangeliso si aad u hesho wixii soo kordha iyo ogeysiisyada.

Mahadsanid

Simon Newport

Madaxa Fulinta

ee Homes Victoria

28/01/2026

search **homes victoria**



homes.vic.gov.au

